



Date: 04/07/2020

**WAR-SAXAAFADEED**

Muqdisho, 04-ka Julay, 2020, Dowladda Soomaaliya waxa ay si kulul u cambaareyneysaa Weerarka Wuxuushninmo ee Argagixisadu ku beegsadeen dad Shacab oo ku sugnaa goob laga cunteeyo oo ku taalla duleedka magaalada Baydhab, halkas oo ay ku dileen 5 qof, halka tobant qof oo kalana ay ku dhaawacmeen.

Dowladda Soomaaliya waxa ay u tacsiyeyneysaa Qoysaska ay Eheladoodu ku waayay Qaraxa, waxayna Caafimaad taam ah u rajeyneysaa kuwii ku dhaawacmay.

Sidoo kale dowladda Soomaaliyo waxa ay ammaam iyo bogaadin u soo jeedineysaa ciidamada amniga oo saakay ka hortagay weerar naftii halignimo ah oo ay kooxaha naflacaariga ah qorsheynayeen in ay ku bartilmaameedsadaan dhismaha Xarunta Ciidamada Ilaalada Canshuuraha Berriga oo ku taalla dagmada Xamarjajab ee Gobalka Banaadir.

Halqof oo ahaa ninkii waday gaariga Qaraxa lagu soo raray ayaa ku geeriyyoda isku daygaasi, 6 qof oo ay ku jiraan ciidankii gaariga is-hortaagay ayaa ku dhaawacmay, waxaa sidoo kale burbur soo gaaray dhismaha xarunta oo dhawaan dib u dhis lagu sameeyay.

Dhammaan weeraradaan ayaa tusaale cad u sida ay usii tabardareynayaan kooxaha xagjirka Soomaaliya, iyadoo ay taasi barbar socotay dhalliyarada kasoo laabaneysa fikirka xagjirka, oo uu ugu dambeeyay Maxamed Abuukar Maxamed oo ahaa Horjoogihii Al Shabaab u qaabilسانا dhaqaalaha Gobalka Shabeellaha Hoose.



**DHAMAAD**